# XEERARKA & DOORBIDYADA QORITUURKA DEGGANAHA PPS

*Dib loo eegay 1/14/2025*

## Xeerarka Qorituurka ee Guud

- Qorituurka degganaha PPS wuxuu u furan yahay ardayda ku nool gudaha xuduudaha degmada. Ardayda ku nool degmooyinka kale waxa waajib ah inay sugaan ilaa inta ay furmayaan dalabka baddalka gudaha degmada gu' kasta, haddii aan mar horeba la helin baddalka degmada dhexdeeda ee sanad dugsiyeedka xiga.

- Dalbadayaasha qorituurku waxa dhici karta inay doortaan ilaa saddex doorasho. Haddii dalbadayaashu ka badan yihiin meelaha bannaan qaybtiiba, lambarro qorituur ayaa la isticmaalaa si loo go'aamiyo ardayda la dooranayo iyadoo la isticmaalayo doorbidyo iyo dheellitirka jinsiga ee u degsan Siyaasadda PPS 4.10.051-P.

- Dalbadayaasha doorashada koowaad ayaa la tixgalinayaa kahor dalbadayaasha doorashada labaad, ilaa dalbadayaasha doorashada saddexaad, iyo haddii ay meelo bannaan soo haraan. Dugsiyada meelaha gaarka ah diiradda saara aad ayaa loo jecel yahay, waxaana meelaha bannaan badankooda buuxiya dalbadayaasha doorashada koowaad. Natiijooyinka qorituurrada dhawaa waxa laga heli karaa http://www.pps.net/Page/10354.

- Ardaydu waa inay iska diiwaangaliyaan dugsiyada ay isku bedelayaan ee loo ansixiyey tobanka maalmood ee ugu horeeya sanad-dugsiyeedka 2025-26. Qoysaska waxa dhici karta in laga doono shuruudo dheeraad ah si ardaydoodu u mutaystaan qorituurka. Qoysaska buuxin waaya shuruudaha taariikhda loo qabtay way waayi doonaan natiijadooda qorituurka.

## Doorbidyada iyo Dheellitirka Qorituurka

*KA FIIRI LIISKA CALAA BARNAAMIJ BOGGA 3*

**Doorbidyada Qorituurka:**

- **Doorbidka walaalaha isku dugsi dhigta**: Walaalaha dugsi wada dhigtaa waa kuwa kuwada nool guri ee dhigan doona dugsi/barnaamij isku mid ah isla wakhti. Doorbidyada walaalaha isku meel dhigta ayaa dalbadaha marka koowaad lagu doortaa halkaasi oo ugu yaraan hal walaal uu hadda dhigto.

- **Doorbidyada mutaysiga dakhliga:** Ardayda dhigata xannaanada Head Start ama u qalma cuntooyinka fadaraalku maalgaliyo ee bilaashka ama qiimaha la dhimay ayaa hela doorbidyada dugsiyada iyo barnaamijyada meelaha ay jiraan arday kooban oo cuntada u qalanta marka loo eego celceliska degmada.

  Cuntada bilaashka ah ee dugsiga iyo degmada ee sanadlaha ah ee warbixinaha xaqiijinta ayaa loo isticmaalaa go'aaminta dugsiyada/barnaamijyada qorituurka ee u qalma doorbidista. Xaqiijinta Tooska ah waa hannaan ay maraan gobolada iyo hay'adaha waxbarasho ee maxalliga ah si ay u xaqiijiyaan carruurta u qalanta cuntooyinka bilaashka ah iyadoon loo baahan dalabyada qoyska.

  Tirada ardadya ee sida tooska ah loo xaqiijiyo waxay hormo u yihiin wadarta tirada ardayda mutaysatay cuntooyinka bilaashka ah iyo kuwa qiimaha la dhimay. Si loo go'aamiyo saamiga meelaha bannaan ee dugsi ama barnaamij qorituur mutaystay, heerka xaqiijinta tooska ah ee degmada ayaa lagu dhuftaa 1.6, sida ku cad hagitaanka Waaxda Beeraha Maraykanka.

  Bakhtiyaa-nasiibka 2024-25-26, waxaa mudnaanta u-qalmitaanka la sii doonaa dugsiyada iyo barnaamijyada heerka shahaado-siinta tooska ah ama ka hooseeya boqoleyda 31.3%. Dugsiyada iyo barnaamijyada ay meelaha bannaan ee qorituurku gaarayaan 50.1% waxa loo hayn ardayda mutaysiga dakhliga. Qoysaska waxa loo sheegi karaa inay dakhligooda xaqiijiyaan kahor soo gabogabaynta bandhigyada qorituurka oo ku salaysan doorbidyada mutaysiga dakhliga.

**Dheellitirka Jinsiga:** Isir dheellitir oo yar oo loogu talogalay jinsiga ayaa lagu isticmaalaa tirada qorituurka ardayda, taasi oo kordhinaysa tirada ardayda ee dugsi kasta. Yoolka dheellitirka ee marba marka ka dambaysa waa inuu si dhaw u muujiyo celceliska jinsiga ee degmada. Ardayda isku yaqaan inay yihiin jinsi-laawe waxay heli doonaan isir dheellitiran dhammaan qorituurrada. Celcelisyada degmada ee jinsiga loogu talogalay ee dugsi kasta ayaa la ururiyaa bilawga wareegga qorituurka.

## Kooxaynaha Meelaha Bannaan ee Qorituurka

**Wax-ku-barashada Laba Luuqadood:** Barnaamijyada Waxbarashada Labada Luqadood ee Wax Lagu Barto inta badan waxaa loo qaybiyaa Codsadayaasha kooxo-kooxo iyada oo lagu salaynayo waayo-aragnimadooda ay luqada u leeyihiin iyo cinwaanka guriga ay degan yihiin,dhinaca kalena waxaa gaar loo yeelayaa luqad kasta iyo kooxeynta juquraafigeeda.

- **Kooxaynaha Luuqadeed:** Barnaamijyada Laba Luuqadood Wax lagu Barto waa kuwa ugu guulaysiga badan marka ardaydu ay ka kooban qaar luuqado badan ka soo jeeda. Codsadayaasha waxaa loo kooxeynayaa iyada oo lagu salaynayo xiriirka ay la leeyihiin luqada lammaanaha ee Waxbarashada Lagu Qaadanayo:
  - Qof ku hadla afka hooyo: arday inta badan kula xiriiri jiray (hadalka iyo dhegaysigaba) luqadda lammaanaha ugu yaraan hal waalid/masuul tan iyo dhalashadii. Tan KUMA jiraan xannaano-carruureedka laba-luqadlaha ah ama dugsiga barbaarinta.
  - Heritage (hiddaha) speaker: arday inta badan ku hadla Ingiriisi laakiin leh xubno qoys (sida waalid ama awoowe) kuwaas oo ku hadla afka lammaanaha.
  - Qof ku hadla luqad kale (Ingiriisi): arday aan ku hadlin afka hooyo. Tan waxaa ka mid ah: ardayda ka soo jeeda qoysaska ku hadla Ingiriisiga kaliya, Ardayda qoyskoodu ku hadlaan luqad kale guriga, taas oo aan ku jirin luqadda lammaanaha, ardayda leh qaar ka mid ah aqoonta luqadda lammaanaha iyada oo loo marayo waxbarid ama soo bandhigid xubin qoyska ka mid ah (tusaale bixiyaha xanaanada carruurta laba luqale).

- **Barnaamijyada xaafadda oo kaliya:** Barnaamijyada Luuqadda Isbaanishka wax lagu barto ee James John, Scott iyo Sitton waxay kaliya u furan yihiin ardayda ku nool xuduudaha dugsigu aqbalo gudahooda. Ma jirto meelo bannaan oo qorituur oo loo hayo ardayda ku nool meelo ka baxsan xuduudaha dugsigu oggol yahay.

- **Kooxaynta Xaafadda:** Barnaamijyada ay isku meel ku yaalaan dugsiyada xaafadda, ardayda ku nool xuduudaha dugsigu oggol yahay waa koox qorituur oo gaar ah.

- **Doorbidyada goboleed:** Wixii ka dambeeyey **Qaraarka 4383,** waxa jira afar gobol oo Isbaanishka waxa lagu Barto K-12 halkan PPS. Codsadayaasha Xannaanada ee ku nool gudaha deegaanka ayaa loo doortay bakhtiyaa-nasiibka kor ku xusan codsadayaasha ku nool deegaanada kale. Tusaale ahaan, dalbade dugsiga barbaarinta ah oo ku nool xaafadda Stephenson, ee SW Portland, wuxuu gali doonaa qorituurka Luuqadda Isbaanishka wax lagu Barto kahor ardayga ku nool xaafadda Sabin ee NE Portland. Ka fiiri bogga 5 kooxaynaha goboleed.

- **Dr. Barnaamijka Luuqadda Shiinaha Wax lagu Barto ee Martin Luther King Jr:** Kooxaynaha barnaamijkan waxa ku jira meelo bannaan oo loogu talogalay ardayda dhigata Barnaamijka Luuqadda Shiinaha Wax lagu Barto ee Albina Head Start iyo barnaamijka Dr. M.L. King Pre-K.

**Dheellitirka Goboleed ee Benson:** Wixii ka dambeeyay Qaraarka #4866, dalbadayaasha Benson waxa kooxaynta lagu saleeyaa aagagga dugsiyada sare ee xaafada, si natiijada qorituurku u noqoto mid ardayda degmada oo dhan ka wada muuqato, ardayda Benson waxa la dooran iyadoo lagu salaynayo tirada qorituurka dheellitiran, xaaladda walaalka iyo dugsiga saadaasha, ama dugsiga arday la filayo inuu dhigto haddii aan loo oggolaan meel kale. Tirada ugu badan ee ka socota dugsi saadaasha ku jira oo kasta waxa lagu go'aamin iyadoo lagu salaynayo tirada dalbadayaasha ee guud. Hadday suurtogal tahay, wax ka yar 50 arday ayaa laga dooran karaa dugsi kasta oo saadaasha ku jira. Dheellitiraha waxa kaliya la isticmaalaa marka ay jiraan dalbadayaal ka badan meelaha bannaan ee heerka fasalka.

# DOORBIDYADA IYO KOOXAYNAHA QORITUURKA PPS

| | Doorbidyada Qorituurka | | Kooxaynaha Qorituurka Meelaha Bannaan | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Dugsiyada iyo Barnaamijyada Qorituurka** | **Walaalo Isku Dugsi Dhigta** | **Mutaysiga Dakhliga** | **Luuqadda** | **Xaafadda** | **Gobolka** | **Macluumaad Dheeraad ah** |
| Buckman Arts E.S. | ★ | | | | | Ardayda xaafaddu waxay toos isku qori karaan dugsiga mana maraan qorituurka |
| Bridger Creative Science K-8 | ★ | ★ | | | | Ardayda xaafaddu waxay toos isku qori karaan dugsiga mana maraan qorituurka |
| Odyssey K-8 | ★ | ★ | | | | |
| Sunnyside Environmental K-8 | ★ | ★ | | | | Ardayda xaafaddu waxay toos isku qori karaan dugsiga mana maraan qorituurka |
| Winterhaven STEAM K-8 | ★ | ★ | | | | |
| da Vinci Arts M.S. | ★ | ★ | | | | |
| Benson Polytechnic H.S. | ★ | | | | ★ | |
| Jefferson Middle College H.S. | ★ | | | | | |
| ACCESS Academy Gr 2-8 | ★ | ★ | | | | Doorbidka Mutaysiga Dakhliga ayaa laga horraysiiyaa doorbidka Walaalaha Isku Dugsi Dhigta |
| Metro Learning Center K-12 | ★ | ★ | | | | Doorbidka Mutaysiga Dakhliga ayaa laga horraysiiyaa doorbidka Walaalaha Isku Dugsi Dhigta |
| Ainsworth E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | ★ | ★ | ★ | ★ | Fiiri Nidaamka Horumarka Barnaamijka ee kooxaynta goboleed |
| Atkinson E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | ★ | ★ | ★ | ★ | Fiiri Nidaamka Horumarka Barnaamijka ee kooxaynta goboleed |
| Beach E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | ★ | ★ | ★ | ★ | Fiiri Nidaamka Horumarka Barnaamijka ee kooxaynta goboleed |
| Dugsiga Cesar Chavez K-8 ee Isbaanishka Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | ★ | Fiiri Nidaamka Horumarka Barnaamijka ee kooxaynta goboleed |
| Lent E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | | ★ | | ★ | Ardayda xaafaddu waxay toos isku qori karaan dugsiga mana maraan qorituurka |
| James John E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | | Qorituurka kama qaybgali karaan ardayda ku nool meel ka baxsan xuduudaha dugsiga |
| Scott E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | | Qorituurka kama qaybgali karaan ardayda ku nool meel ka baxsan xuduudaha dugsiga |
| Sitton E.S. Isbaanish Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | | Qorituurka kama qaybgali karaan ardayda ku nool meel ka baxsan xuduudaha dugsiga |
| Dr M.L. King Jr. E.S. Shiine Wax lagu Barto | ★ | | ★ | | | Kooxaynta qorituurka ee Albina Head Start iyo Dr. M.L. Ardayda King Jr PK |
| Clark E.S. Shiine Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | | |
| Woodstock E.S. Shiine Wax lagu Barto | ★ | | ★ | ★ | | |
| Richmond E.S. Jabbaaniis Wax lagu Barto | ★ | ★ | ★ | | | |
| Kelly E.S. Ruush Wax lagu Barto | ★ | | ★ | | | |
| Rose City Park E.S. Fiitnaamiis Wax lagu Barto | ★ | ★ | ★ | | | |

# LAYLIGA GOBOLEED EE DUGSIGA SARE EE ARDAYDA ISBAANISHKA WAX KU BARTA

